

BAYAANKA DOORASHADA 2019-2022

WADA-JIR KU AADAN AMAANKA IYO HORUMARKA

Waxaynu haysanaa wax badan oo aynu ku faraxsanaano gudaha Sandviken. Dugsiyo xanaano ayaa la dhisay, hoyga dadka waayeelka ah ee Ängsbacken ayaa la furay isla sanadkanba oo waxaynu noqonay degmada dhaqanka ee sanadkan 2018. Laakiin waxaynu doonaynaa dheeraad.

Si amaan daradu u yaraato waxaa loo baahanyahay dadaalo keena rajo mustaqbalka ah, tusaale ahaan xoojinta iskoolada iyo goobo isboorti oo casri ah. Si wada-jir ah ayaynu tani u samaynaynaa!



Socialdemokraterna
i Sandviken

Sandviken - warshadaha casriga ah- iyo degmo- dhaqan

Sandviken waxay noqon doontaa warshadlay casri ah- iyo degmo dhaqan. Halkan kuma sharaxayno dhamaan arrimaha aanu ka shaqayn doono si taasi loo gaaro, laakiin waxay tani sawir ka bixinaysaa waxa aanu u aragno inay tahay muhiim.

Bulsho dimoqraadi ah waxaa laga dhisi karaa heer maxali ah, laakiin si loo helo siyaasad bulsho dimoqraadi ah oo xoogan waxaa kale oo loo baahanyahay hogaamin dimoqraadiyad bulsho heer qaran iyo gobol labadaba.

Anagayaga ah xisbiga bulshada dimoqraadiga ah ma iska soo hor jeedino kuwa buka iyo kuwa caafimaadka qaba, waayeelka iyo da'yarta, ragga iyo haweenka, magaalo iyo miyi ama qofka shaqeeya iyo qofka waayay shaqo. Sandviken teenu waa bulsho furan taas oo ah mid dhaqamo badan, dimoqraadi, cadaalad iyo sinaan.

**Codkaaga ayaa wax go'aaminaya.
Waanu kugu xisaabtamaynaa maalinta
doorashada!**

Degmo koraysa

- **Miyi nolol leh iyo faras-magaalo nolol leh waxay horumariyaan degmada**
- **Muwaadiniintu waa inay ka qayb-qaadasho ku lahaadaan degmada horumarkeeda**
- **Waa inaynu horumarinaa xaafado la dego oo soo jiidasho leh oo haqab tiraya baahiyaha mustaqbalka ee guryaha**
- **Waa inaynu sii wadnaa dhisida intarnat balaaran dhamaan gudaha degmadan**

Shaqo iyo koritaanka dhinaca aaminaada mustaqbalka

- **Waa inaynu balaarinaa dhismaha waxbarashada dadka waaweyn oo xooga la saaraa xirfadaha uu ka jiro gabaabsi shaqaale**
- **Dadka bilaa shaqada ah waa in lagu casuumaa hawlo u horseeda shaqo**
- **Waa inaynu aqoon ku kaalmayno suuqa shaqada ee mustaqbalka**
- **Waa inay shirkadaha u fududaataa inay hawshooda sal-dhigtaan kuna horumariyaan gudaha Sandviken**
- **Qandaraasyadu waa inay bixiyaan goobo tababar shaqo iyo shuruudo fiican dhinaca shaqaalaha isla markaana fursado fiican dhinaca shirkadaha maxaliga ah inay ka qayb qaataan oo horumaraan.**

Aqoontu way sii xoojinaysaa Sandviken

- **Iskoolada Sandviken waa in caruurta iyo ardaydu ay saamayn ku yeeshaan waxbarashooda**
- **Dhamaan ardayda dhigata dugsiga hoose-dhexe waa inay u qalmaan u gudbida barnaamijka qaran ee dugsiga sare**
- **Dugsigeena sare waa inuu wajahaa ardayda xiisahooda iyo baahida suuqa shaqada labadaba**
- **Waxaanu doonaynaa inaanu burburino kala sooca bulshada si dadka oo dhan u helaan waxbarasho isku qiimo ah**

Daryeel iyo xanaano fiican gudaha degmada oo dhan

- **Shaqaalaha xanaanada waa inay wakhti dheeraad ah u helaan xanaanada muwaadiniinta**
- **Dadka la siiyo xanaanada waa inay helaan xoriyad doorasho oo badan dhinaca sida hawlahooda loo fulinayo**
- **Amaanka xanaanada iyo dadka xanaanada la siiyo madax banaanidooda waa inay korodho**
- **Dadka la siiyo xanaanada waa inay awoodaan sii wadida horumarka xiisahooda**
- **Lacagta wada-jir loo leeyahay waa inaan loo isticmaalin qaadashada faa'iidooyin ee dhinaca shirkadaha gaarka loo leeyahay**

Sandviken waaraysa

- **Waxaanu doonaynaa inaanu kordhino aqoonta ku saabsan arrimaha bi'ada**
- **Raashinka qaybta lagu soo beeray si deegaanka u fiican iyo meel dhow ee gudaha hawlaha degmada waa inay korodhaa**
- **Waa inaynu yaraynaa alaabta gaadiidka lagu qaado oo u hawl galnaa gaadiid dadweyne oo fiican**
- **Waxaanu doonaynaa inaanu Sandviken ka dhigno degmo baaskiil**
- **Storsjön waa arrin deegaan iyo tamashlo oo muhiim ah**

Isku xirnaanta amaan sii kordha

- **Waxaanu abuuri doonaa bulsho aynu kulano iyadoo laga gudbay xuduudaha dabaqadaha si loo xoojiyo mabaa'diida dimoqraadiyada**
- **Waxaanu abuuri doonaa deegaano nolol oo shaqaynaya dhinaca magaalo iyo miyi labadaba**
- **Waxaanu ka hortagi doonaa kala sooca bulshada oo kor u qaadi doonaa xaafadaha bulsho dhaqaale ahaan u dhibaataysan**

**Xisbiga Socialdemokraterna
ee Sandviken**

Bogga intarnatka: sapsandviken.se

Facebook: facebook.com/s.sandviken

Twitter: twitter.com/ssandviken